

Qoraal kooban u ku saabsan xeerarka isticmaalka adeegga bilaa lacagta ah ee Celia oo ku socda macaamiisha cusub

Qoraalkan kooban waxa ku qoran macluumaad ku saabsan xeerarka khuseeya macaamiisha cusub ee isticmaala adeegga Celia. Xeerarka isticmaalka oo dhamaystiran oo khuseeya macaamiisha cusub ee Celia waxa laga heli karaa ciwaanka www.celia.fi/kayttosaannot. Qofku marka uu galo isticmaalka adeegga Celia waxa uu xaqiijinaya in uu isticmaalayo xeerarka isticmaalka ee u dajjisan adeegga.

Xuquuqda isticmaalka ee buugaagta Celia

Buugaagta Celia waxa isticmaali kara shaqsiyadka anan u awoodaynin inay akhriyaan qoraalka caadiga ah sababo la xidhiidha lixaad la'aan ama xanuun ama awood darro kale darteed. Amaahashada buugaagta dhagaysiga ah waxa la bilaabi 4 jir marka uu ilmuu yahay. Caruurta 15 sano ka yar marka ay buugaagta amaahanayaan waxa ay tahay inay ku isticmaalaan yada oo waalidkood mas'uul ka yahay.

Bilaabidda isticmaalka adeegga Celia

Qofku waa in uu iska diwaangaliyaa adeegga Celia isticmaalkeeda isaga oo jooga maktabad, jaamacad ama iskuul si uu u amaahan karo buugaagta.

Macaamiilka isticmaalayaa uma baahna in uu keeno caddayn caddaynaya carqaladda akhriskiisa ku saabsan. Shaqaalahaa goobta uu ka furanayo adeegga ayaa macaamiilka u sheegaya isticmaalka adeegga macluumaadka ku saabsan iyo xadaynta ku saabsan isticmaalka yaga ayaana hubinaya xuquuqdiisa waxbarasho. Qofka macaamiilka ah isaga ayaa ka mas'uul ah in uu leeyahay carqalad akhriskiisa ka hor taagan si uu xaq ugu yeesho in uu isticmaali karo adeegga Celia.

Amaahashada buugaagta

Amaahashada buugaagta aqoonta iyo kuwa sheekooyinka ah ee Celia waa bilaa lacag. Wawa kale oo bilaa lacag ah amaahashada buugaagta waxbarashada.

Macaamiilka isticmaalaya adeegga buugaagta ama qofka uu ku xidhanyahay waxa uu heli karaa macluumaadka uu kaga dhix isticmaali karo shabakadda interneta ee ablikayshanka taleefanka gacanta. Macaamiilka isticmaalaya wxa u banaan in uu amaahdo ugu badnaan boqol buug bishii.

Soo jeedinta ku saabsan noocyada buugaagta ee la soo saari karo

Celia waxa laga qaabilaa fikradaha ama soo jeedinta macaamiisha ee ku saabsan buugaagta lagu darayo adeegga ee aqoonta iyo sheekooyinka ah.

Dugsiga hoose dhexe, waxbarashada darajada labaad ama darajada sare buugaagta lagu dhigto waxa loo soo saaraa nidaam u gaar ah oo la xidhiidha siyaasadda buugaagta waxbarashada. Buugaagta cusub ee nidaamka laga qaybgalinayo baddalaadooda soo jeedinta ku saabsan sharchiyo ayaa jira lagu xadeeyo adeecidooda.

Waxa ka iman kara isticmaalka khaldan

Buugaagta ku jira nidaamka Celia waxa lagu soo saaray xeerka waafaqsan ilaalinta xuquuqda soo saaraha ee 17 §. Sii gudbinta buugaagtaa ama ka dhix qaybintooda internetku waa mamnuuc. Buugaagta la soo dajjiyo waxa lagu daraa calaamad shaanbad u ah oo digital ah oo lagu aqoonsanayo buugga asalka ah.

Sharchiyada isticmaalka jabintooda culus ee joogtada ah waxay keenaan adeegga Celia isticmaalkeeda oo lagaa mamnuuco muddo cayiman. Istimcaalka khaldan ee cad ama jabinta sharchiyada waxa laga samayn karaa ogaysiis dambi. -

Ilaalinta macluumaadka iyo cilaaqaadka ku saabsan macaamiisha isticmaalka adeegga

Wakhtiga isdiwaangelinta macluumaadka la bixiyay iyo muddada isticmaalka adeegga macluumaadka la helay waxa lagu kaydiyaa nidaamka macluumaadka. Celia waxay xaq u leeyihiin inay wargaliyaan macaamiisha adeegga isticmaala isbadaladda ku yimaadda isticmaalka adeegga iyo waxyaalaha la xidhiidha yaga oo u isticmaalaya



nidaamyada isgaadhsinta warka ee ku habboon. Macluumaad dheeri ah oo la xidhiidha difaaca macluumaadka waxad ka heli kartaa ciwaankan
www.celia.fi/tietosuoja.

Xeerarka isticmaalka waxa la cusboonaysiiyay 26.2.2018 waxayna shaqaynayaan wakhti xaadirkan.

